



Waa maxay Isbeddelka Cimiladu waxay uga dhigan tahay caafimaadkaaga

Isbeddelka cimiladu waa horeba u saameeyay dadka Maine. Waxay sababtaa dabaylo badan oo waxyeelo u geysta guryaha iyo meelaha ay dadku ka shaqeeyaan ee xeebaha ah, waxay ka dhigtaa hawada iyo biyaha inay noqdaan kuwo aan caafimaadka ku haboonayn , waxayna keentaa maalmo kulayl badan oo khatar ku ah dadka qaarkood inay dibadda joogaan.



Saamaynta Caafimaad ee Isbeddelka Cimilada

- Qiiqa ka dhasha dabka ka soo baxa duurka iyo wasakhda ayaa ka dhigaya neefsashada mid adag , gaar ahaan dadka qaba neefta ama xasaasiyada.
- Maalmaha aadka u kulul waxa ay kordhiyaan halista daalka kulaylka ama istarooga kulaylka, gaar ahaan dadka waaweyn, carruurta, iyo shaqaalaha aan qaboojiye lahayn.
- Kulaylka iyo qoyaanku waxay sababaan caarada inay ka baxdo guryaha, taasoo ka sii daraysa dhibaatooyinka neefsashada.
- Duufaanno iyo daadad ayaa waxyeeleeyay guryaha, waxay gooyeen korontadii, waxayna khalkhal geliyeen bulshada.
- Cimilada kuleylka leh waxay caawisaa caarada iyo kanecada inay faafiso cudurrada sida cudurka Lyme iyo fayraska West Nile.



Tallaabooyinka aad qaadi karto

Inkasta oo ay jiraan saamaynta waxyeelada leh ee isbeddelka cimilada, waxa jira agabyo la heli karo iyo tallaabooyin aad qaadi karto si aad u daryeesho naftaada, kuwa aad jeceshahay iyo bulshadaada.



- Wax ka baro **soo kabashada dekedaha ganacsiga** ee ay bixiso Waaxda Dhaqaalaha iyo Horumarinta Bulshada.
- Ka hel taageerada fayo-qabka adigoo isticmaalaya **StrengthenME barnaamij** ama wac **Khadka Dhibaataada Musiibada** sida: **1-800-985-5990**.
- Qaad tallaabo ku saabsan isbeddelka cimilada **Ciidanka Cimilada ee Maine** ama **Ciidanka Cimilada Maraeykanka**. Waxaa sidookale oo aad ka dalban kartaa adigoo isticmaalaya maalgelinta **Iskaashiga U adkaysiga Bulshada**.
- Ka hel maalgelinta, dhimista, iyo agabka **Xafiiska Hal-abuurka Siyaasadda ee Guddoomiyaha**, oo ay la socoto qorshayaasha mustaqbalka iyo macluumaadka ku saabsan Golaha Cimilada Maine.